# Hagaha Kiraynta Guriga



SOLIDARITY NOW

This is our common ground

# Qeexitaanno

**Dammaanad**: wa lacag kiraystuhu siiyo mulkiilaha bilowga kirada si dammaanad ah; tusale ahaan, haddii uu dido inuu bixiyo kirada ama uu waxyeleyo guriga, mulkiiluhu wuu hayn karaa lacagtaa dammaanada ah.

**Mamulaha dhismaha:** waa qofka masuul ka ah dayactirka meelaha wadajirka ah ee dhismaha iyo bixinta khaqarashadka guud.

**Kharashaadka guud**: waa dhamaan kharashaadka ku baxa dayactirka iyo meelaha wadajirka ah iyo qalabka dhismaha

**Biilka korontada:** waa biilka korontada. Wadarta lacagta waxa ku jira isticmaalka korontada iyo sido kale canshuuro qaarkooda, tusaale ahaan, kuwa dagmada ama telefishinka qaranka.

**Dabaqa dhulka:** (Gr ισογειο) wa guri ku yaalla heerka dhulka la siman.

**Dabaqa-dhexe:** (Gr ημιόροφος) dabaq ku yaalla inta u dhaxaysa dabaqa hoose (ground floor) iyo dabaqa kowbaad.

**Guri gaar ah:** (Gr Μονοκατοικία) dhismo guri oo madax-bannan, kana duwan guri ku jira dhisme dabaqyo badan (apartment building).

**Guri qol ah:** (Gr Γκαρσονιέρα) guri yar oo leh hal qol jiif, musqul (wc), iyo qol fadhiga iyo jikada oo ku wada yaala hal mee loo wadaag ah.

**Guri labo qol ah:** (Gr Δυάρι) guri leh labo oo kala gaar ah, iyo sidoo kale jikada iyo musqusha. Sidaas oo kale , guri seddex qol ah wuxuu leyahay seddax qol kala gaar ah, iyo jikada iyo musqusha (wc)

**Istuudiyo:** guri yar oo qol jiif, qol fadhiga, iyo jikada ay dhamaantoda ku wada yalaan hal meel isku furan.

**Heshiis:** dukumiinti muhiim ah oo qeexayo shurudaha iyo xeerarka kiraysiga guri.

**Saacadaha xasilloonida:** waa sacado ay tahay in lga fogaado hawlaha iyo shaqooyinka buuqa badan Sameeya. Sacadahani waa sida so socoto:

- 1-da Abriil ilaa 30-ka Sebteember ilaa 15:00 iyo 17:30 iyo

23:00 ilaa 7:00

- 1-da October ilaa 31ka March ilaa 15:30 ilaa 17:30 iyo ilaa

22:00 until 07:30



# Xageeen ka bilaabaa?

Waxa ugu horreeya ee ay tahay inaad sameyso ka hor inta aadan bilaabin raadinta guri waa **inaad samaysato qorshe.** Qorshahan waa inuu ka koobnaadaa waxyaabaha soo socda.

- Aagga kee ayaad rabtaa inaad degto?

Waxaad jeclaan kartaa guri ama wuu noqon karaa mid jaban, laakiin haddii uu ka fog yahay shaqada, waxaad ku bixin doontaa waqti iyo lacag badan safarka. Taasi waxay ka dhigi kartaa guriga mid qaali noqda.

- Immisa mitir oo laba jibbaaran ayaad rabtaa inuu gurigu ahaado?
- Ma rabtaa in gurigu leeyahay alaab guri mise maya?
- Immisa lacag ah ayaad awoodi kartaa inaad kirada guriga bixiso bil kasta?
- · Noocee kululeyn ah ayaad doorbideysaa?

# Kharashaadka guriga kirada

Kiradu way kala duwantahay guri ilaa guri. Qiimaha kiradu wuxuu ku xiran yahay wax yabahaan:

- Xagga uu guriga ku yaalo
- Cabirka guriga (mitir laba jibaran). Guud ahaan, Guriyaha waaweyn kiradooda way ka badan tahay, biilashooduna sidoo kale wey sareyaan (tusaale, koronto).
- in uu alaab guri leyahay ama may-guryaha alabaysan waa ka qalisanan yihiin. Bada guryaha waxa la kireeyaa iyago aan alaab lahayn ama leh alaab yar, waxaad iibsan kartaa alaab iyo qalab la isticmaalay oo jaban.
- Waqtiga aad guriga raadinayso – tusaale ahaan xagaaga guryaha way qaali noqdaan sababtoo ah arday badan ayaa magaalada yimaada.
- Da'da guriga. Guryaha cusub badanaa waa qaali, laakiin inta badan waxay leeyihiin dahaadh fiican, sidaas darteed kuleylinta ama qaboojintoodu waa ka jaban tahay.

## Kharashaadka Joogtada ah

- Kharashaadka wadajirka ah: waa kharashaadka dhismaha (koronto jaranjaro, wiish, nadaafad, iwm) oo ay wadaagaan dhammaan dadka degan.
- biilka korontada.
- biilka biyaha.
- Internet/telefon (haddi aad dorato ina qadato).
- kuleylinta jiilaalka (gaas, saliid kuleyl, korontada).

## Kuleylinta

Si faahfaahsan, kuleylintu waxay noqon kartaa:

**Madaxbannaan:** Tani waxay ka dhigan tahay inaad adigu xakameyso goorta aad rabto kuleylka ama aanad rabin, adigoo shidaya radiators-ka/airconditioner-ka iwm.

**Dhexdhexaad:** Tani waxay ka dhigan tahay in dhismaha si wadajir ah uu u buuxiyo taangiga saliid/gaas, radiators-kuna si otomaatig ah ayey u shidmaan waqtiyo hore loo qorsheeyay. Qiimaha saliid/gaaska waxaa lagu bixiyaa kharashaadka wadajirka ah.

Fiiro gaar ah: badanaa, guryaha ugu da'da weyn, waxaa jiri kara kuleyl dhexe, laakiin dhismaha ma rabo in la isticmaalo, sidaas darteed waa inaad heshaa hab kale oo kuleyl ah. Sidoo kale, haddii kuleyl dhexe jiro laakiin aadan rabin, waxaad la heshiin kartaa maamulaha dhismaha si lagaa reebo.

# Sida loo raadiyo guri

Markaad qorshahaaga dhammaystirto oo aad hubto waxa aad raadineyso, waxaad diyaar u tahay inaad bilowdo raadinta. Raadintu waxay noqon kartaa:

- **Online:** Bogagga internetka sida spitogatos.gr, rentola.gr, remax.gr, xe.gr, spiti24.gr, tospitimou.gr, spiti360.gr, plot.gr iyo kuwo kale oo badan. Bogaggani sidoo kale waxaa lagu tarjumi karaa Ingiriisi. Waxa kale oo lagu raadin karaa baraha bulshada sida Facebook Marketplace.

- **Xayaysiisyo jidka ku yaal:** albaabada dhismayaasha, tiirarka, istaamaha basaska, daaqadaha dukaamada iwm (warqado jaalle leh oo xarfaha cas yihiin) ama joornaalada.




- **Kaashiga wakiilka guryaha** (Real Estate Agent). Waxaa suurtagal ah inaad ka hesho guriga wakiil guryaha ah. Laakiin ogow in wakiilka guryaha uu qaadi doono lacag adeeg oo badanaa u dhiganta hal ama labo kirada bil kasta. Lacagta wakiilka way ka duwan tahay dammaanadda iyo kirada aad bixin doonto. Hab fiican oo kale waa inaad ka hesho saaxiibo yaqaan guri la kireynayo ama guri ka baxaya, iwm.

# Maxaa laga taxaddaraa?

Dooro xayaysiisyada dhowaan la dhajiyay. Xayaysiisyada taariikhdu ka duugtay way dhici kartaa inaanay sax ahayn ama laga iloobay in la tirtiroDooro xayaysiisyada leh sawiro guri. Tani waxay kaa caawinaysaa inaadan waqti ku lumin guri aadan jeclayn ama aan buuxin baahiyahaaga. Haddii aad jeclaatay guri sawirada ka muuqda, ha degdegin inaad kireysato adoon ballan u sameynin inaad guriga si toos ah u aragto. Sawiradu mararka qaar way marin habaabi karaan ama been abuur yihiin.

Ballamaha waa in lagu sameeyaa subaxdii si xaaladda gurigu u muuqato si cad. Guri si fiican u hubi.

Waxyaabaha la fiiriyo Tuubooyinka biyaha, huurka, caaryada darbiyada iyo gudaha armaajooyinka, Jeex-jeexyada, daloollada, iyo qaab-dhismeedka albaabada Dhagaxa, shinnida, ama cayayaanka kale.

Albaabka amniga iyo haddii daaqadaha si fiican u xiran yihiin, si aanad u lumin kulaylka jiilaalka. Haddii ay jiraan qalabka korontada sida airconditioner ama foorno, xaaladdooda hubi.La heshiiso mulkiilaha qiimaha kirada iyo dammaanadda aad bixin doonto. Weydii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan kharashaadka wadajirka ah ee dhismaha iyo biilasha kale sida biyaha iyo korontada.



# Qandaraaska

Mulkiilaha gurigu wuxuu diyaarin doonaa heshiiska kireynta gaarka ah (private tenancy agreement), kaas oo ay tahay inaad si taxaddar leh u akhrido. Haddii aad ku qanacdo shuruudaha, waa inaad saxiixdaa. Haddii aadan fahmin shuruudaha heshiiska, waa fikrad fiican inaad mulkiilaha weydiiso inuu kuu sharaxo. Haddii uu mulkiiluhu sharxi waayo, la tasho qareen. Haddii aadan ku qanacsanayn shuruudo gaar ah, kala hadal mulkiilaha; haddii uu ogolaado, shuruudahaas waa la saari karaa. Tusaale: Mulkiiluhu wuxuu shuruud ka dhigi karaa in tirada dadka ku nool guriga la xadido, ama in saaxiib qol la keeno aan loo ogolayn, ama xayawaanka guriga laga mamnuuco.

## Dokumentiyada taageero heshiiska( khandaraska)

1. Aqoonsiga milkiilaha iyo kireystaha
2. Shahaadada cashuur celinta milkiilaha iyo kireystaha
3. Shahaadada Waxqabadka Tamarta (Energy Performance Certificate / (Πιστοποιητικό Ενεργειακής Απόδοσης) – waa in mulkiiluhu bixiyo

## Waxyaabaha ku jira heshiiska?

1. Lambarka cadeynta heshiiska
2. Taariikhda soo gudbinta heshiiska online
3. Magaca iyo magaca goyska ee milkiilaha iyo kireystaha
4. Shuruudaha iyo heshiisyada la isku raacay
5. Qiimaha kirada
6. Mudada kirada
7. Cinwaanka, dabaqa, iyo mitirrada laba jibbaaran ee guriga
8. Lambarka mitirka korontada (DEI)
9. Fasalka tamarta (Energy class)

Mudada Heshiiska waxaa lagu qeexaa shuruudaha heshiiska. Haddii aad rabto inaad ka baxdo guriga ka hor dhammaadka heshiiska, Mulkiiluhu wuxuu xaq u leeyahay inuu dalbado kirada lumay iyo dammaanadda aad siisay guriga. Sidoo kale, haddii la isku afgartay, sanad kasta kirada ayaa kordhin karta 1% ilaa 2%.

Ka dib saxiixa heshiiska, mulkiiluhu wuxuu si elektaroonik ah u diiwaangelin doonaa dhammaan xogtiisa nidaamka TAXISnet. Marka mulkiiluhu dhammeeyo gudbinta, nidaamku wuxuu kuu soo diri doonaa email akoonkaaga TAXISnet Waxaad u baahan tahay inaad aqbasho heshiiska kirada online.

ΑΑΔΕ
Ανεξάρτητη Αρχή Δημοσίων Εσόδων

ΕΛΛΗΝΙΚΗ ΔΗΜΟΚΡΑΤΙΑ

## ΑΝΤΙΓΡΑΦΟ ΥΠΟΒΛΗΘΕΙΣΑΣ ΤΡΟΠΟΠΟΙΗΤΙΚΗΣ ΔΗΛΩΣΗΣ ΠΛΗΡΟΦΟΡΙΑΚΩΝ ΣΤΟΙΧΕΙΩΝ ΜΙΣΘΩΣΗΣ ΑΚΙΝΗΤΗΣ ΠΕΡΙΟΥΣΙΑΣ

(ΗΜΕΡΟΜΗΝΙΑ ΔΗΜΙΟΥΡΓΙΑΣ ΤΟΥ ΑΝΤΙΓΡΑΦΟΥ 04/04/2024)

| | | | |
|---|---|---|---|
| ΑΡ. ΔΗΛΩΣΗΣ **1** | | ΗΜ/ΝΙΑ ΥΠΟΒΟΛΗΣ **2** | |
| ΤΡΟΠΟΠΟΙΗΣΕ ΤΗ ΔΗΛΩΣΗ | | | |
| ΣΤΟΙΧΕΙΑ ΕΚΜΙΣΘΩΤΗ: Α/Α 1 | | | |
| Κύριος **3** | | Ποσοστό | |
| ΣΤΟΙΧΕΙΑ ΜΙΣΘΩΤΗ: Α/Α 1 ΓΙΑ ΧΡΗΣΗ ΤΟΥ ΟΠΟΙΟΥ ΕΚΔΟΘΗΚΕ ΤΟ ΠΑΡΟΝ | | | |
| ΟΝΟΜΑΤΕΠΩΝΥΜΟ/ΕΠΩΝΥΜΙΑ **3** | | | |
| ΣΤΟΙΧΕΙΑ ΜΙΣΘΩΣΗΣ | | | |
| ΗΜΕΡΟΜΗΝΙΑ ΕΝΑΡΞΗΣ ΜΙΣΘΩΣΗΣ | | | |
| ΕΙΔΟΣ ΜΙΣΘΩΣΗΣ | | ΗΜ/ΝΙΑ ΥΠΟΓΡΑΦΗΣ | |
| ΣΥΝΟΛΙΚΟ ΜΗΝΙΑΙΟ ΜΙΣΘΩΜΑ **5** | | ΤΟ ΜΙΣΘΩΜΑ ΠΡΟΣΔΙΟΡΙΖΕΤΑΙ ΣΕ ΕΙΔΟΣ | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| ΕΠΙΤΡΕΠΕΤΑΙ Η ΥΠΕΚΜΙΣΘΩΣΗ ΜΕΣΩ ΗΛΕΚΤ. ΠΛΑΤΦΟΡΜΑΣ ΒΑΣΕΙ ΤΟΥ ΑΡΘΡΟΥ 111, Ν. 4446/2016 | | ΠΕΡΙΟΔΟΣ ΙΣΧΥΟΣ **6** | |
| ΣΗΜΕΙΩΣΕΙΣ **4** | | | |
| ΣΤΟΙΧΕΙΑ ΑΚΙΝΗΤΟΥ: Α/Α 1 | | | |
| Κατηγορία Ακινήτου | | ΑΡΙΘΜΟΣ ΑΤΑΚ | |
| ΔΙΕΥΘΥΝΣΗ **7** | | | |
| ΕΠΙΦΑΝΕΙΑ ΚΥΡΙΩΝ & ΒΟΗΘ. ΧΩΡΩΝ | | ΕΠΙΦΑΝΕΙΑ ΑΓΡΟΤ/ΧΙΟΥ/ΟΙΚΟΠΕΔΟΥ/ΓΗΠΕΔΟΥ | |
| ΜΗΝΙΑΙΟ ΜΙΣΘΩΜΑ **5** | | ΑΡΙΘΜΟΣ ΠΑΡΟΧΗΣ ΔΕΗ **8** | |
| ΣΤΟΙΧΕΙΑ ΕΝΕΡΓΕΙΑΚΟΥ ΠΙΣΤΟΠΟΙΗΤΙΚΟΥ ΓΙΑ ΤΟ ΑΚΙΝΗΤΟ ΜΕ : Α/Α 1 | | | |
| | | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Α.Μ. ΠΙΣΤΟΠΟΙΗΤΙΚΟΥ | | ΗΜΕΡΟΜΗΝΙΑ ΕΚΔΟΣΗΣ | |
| ΕΝΕΡΓΕΙΑΚΗ ΚΑΤΑΤΑΞΗ **9** | | Α.Μ. ΕΠΙΘΕΩΡΗΤΗ | |
| ΔΙΕΥΘΥΝΣΗ ΑΚΙΝΗΤΟΥ | | | |

# Maxaa kale oo ay tahay inaad ogaato?



1. Waa inaad ogaataa in kireynta guri ay la socoto xuquuq iyo waajibaad ay tahay inaad raacdo. Tani waxay ka dhigan tahay inaad u hoggaansanto shuruudaha jira ee dhismaha, sida inaadan buuq badan samayn xilliyada aamusan ee wadajirka ah. Sidoo kale, waa muhiim inaadan qashin ka tegin meelaha wadajirka ah, balse aad dhigto qashinka weelasha loogu talagalay. Ugu dambeyn, waa muhiim inaad bixiso kirada bil kasta taariikhda aad la heshiiseen mulkiilaha. Haddii dib u dhac dhaco, waxaa haboon inaad isla markiiba mulkiilaha ogeysiiso.

2. Haddii aad waxyeello u geysato guriga, waa inaad adigu dayactirtaa, tusaale ahaan galaas jaban, laambado gubtay, ama darbiyo wasakhaysan. Dhibaatooyinka dabiiciga ah ee ka dhasha da'da guriga oo **aan ka dhalan isticmaalka xun** (tusaale, dildilaacyo ku dhaca daaqadaha/albaabada, darbiyada iyo sagxadaha, tuubooyin xidhan oo da'da la xiriira, fuse-ka boiler-ka oo gubtay, iwm.) waa in mulkiiluhu dayactiro, waxaana wanaagsan inaad ogeysiiso oo xiriir la joogto. Waxyeelada aynu dayactirno waa in lagu talo-geliyaa khabiir si loo hagaajiyo, **ha isku dayin inaad adigu dayactirto!** Sidoo kale, ha tuurin warqadda musqusha ee musqusha, sababtoo ah way xirnaan kartaa tuubooyinka!

3. Gurigu waa inuu marka la kireeyo ahaadaa mid nadiif ah oo loo dhiibo mulkiilaha. Marka aan ka baxeyno guriga, waa inaan ku soo celinaa xaaladdii uu ku jiray markii aan helnay, haddii kale mulkiiluhu wuxuu xaq u leeyahay inuu ka qabsado lacagta dammaanadda ama inuu naga dalbado dayactirka waxyeelada. Guryaha alaabaysan, alaabta gurigu sidoo kale waa in lagu soo celiyo xaaladdii ay ku jirtay.

# Gunnada

Waxaa muhiim ah in la ogaado in ay jiraan gunnado kaa caawin kara dhinaca dhaqaalaha, sida kaalmo ama qiimo-dhimis ku saabsan korontada, kuleylinta iyo kirada guriga. Kuwani waa sida soo socota:

**Gunnada Kirada:**

Qof kasta oo leh heshiis kireyn oo firfircoon wuu xaq u leeyahay. Shuruudda ugu weyn waa inaad si sharci ah ugu nooleyd Giriigga ugu yaraan 5 sano. Taas macnaheedu waa inaad gudbisay ugu yaraan 5 canshuur celin inta lagu jiro muddada la eegayo.

**Qiimaha Bulshada ee Deggenaanshaha:**

Waa nidaam ku siinaya qiimo-dhimis biilka korontada. Shuruudda ugu weyn waa in mitirka korontadu ku qoran yahay magacaaga iyo inaad gudbisay canshuur celintaada.

**Gunnada Kuleylinta:**

Waa kaalmo daboolaysa qayb ka mid ah isticmaalka saliidda, gaaska, iwm, inta u dhexeysa Oktoobar iyo May. Sidoo kale, shuruudda ugu weyn waa in lambarka mitirka korontadu ku qoran yahay magacaaga iyo inaad gudbisay canshuur celintaada.

SOLIDARITY NOW
This is our common ground

Macluumaad dheeraad ah, ama wax kasta oo kale oo aad u baahan tahay, waxaad nagala soo xiriiri kartaa

**Athens Solidarity Center**
Domokou 2 & Philadelphias, Athens
+30 2108220883
athens@solidaritynow.org

**Blue refugee Center**
Ioanni Koletti 25D, Thessaloniki
+30 2310 555263-4-6
thebluecenter@solidaritynow.org